بسم الله الرحمن الرحيم

# AXDIGA

## DAWLAD GOBOLEEDDA PUNTLAND

PUNTLAND DEVELOPMENT RESEARCH CENTER
PDRC GAROWE

PUNTLAND DEVELOPMENT RESEARCH CENTER
PDRC GAROWE

WAXAA LAGU ANSIXIYEY
SHIRWEYNAHA DASTUURIGA AH EE DAWLADDA PUNTLAND
GAROWE, 15 May 1998

PUNTLAND DEVELOPMENT RESEARCH CENTER
PDRC GAROWE

# TUSMADA AXDIGA

ARARTA AXDIGA.


**Qaybta Kowaad: Arrimo Guud, Federaal, Dimoqaraadiyad iyo Dhaqan**

Qodobka 1 : Dawladda Puntland
Qodobka 2: Diinta Dalka
Qodobka 3: Calanka, Astaanta iyo Heesta Qaran
Qodobka 4: Luqadaha Dalka
Qodobka 5: Xiriirka DibEdda
Qodobka 6: Xuquuqda Qofka iyo Xorriyadda Asaasiga ah.

**Qaybta Labaad: Qaab-dhismeedka Dawladda Puntland**

Qodobka 7: Saddexda Qaybood ee Awoodaha Dawladda
Qodobka 8: Golaha Wakiillada
Qodobka 9: Shuruudaha xulidda Wakiillada
Qodobka 10: Xilalka iyo Awoodaha Golaha Wakiillada
Qodobka 11: Sasaanadda Wakiillada
Qodobka 12: Golaha Xukuumadda
Qodobka 13: Wasaaradaha iyo Hay'adaha Xukuumadda
Qodobka 14: Xil ka-qaadista Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka
Qodobka 15: Xil ka-qaadista Wasiirada
Qodobka 16: Xasaanadda Wasiirada
Qodobka 17: Hay'adaha Madax-bannaan
Qodobka 18: Ku Baahinta xukunka Gobollada & Degmooyinka
Qodobka 19: Garsoorka
Qodobka 20: Maxkamadda Sare
Qodobka 21: Maxkamadda Dustuuriga
Qodobka 22: Xeer Ilaaliya Guud
Qodobka 23: Guddiga Sare ee Garsoorka
Qodobka 24: Xasaanadda Garsoorayaasha
Qodobka 25: Xilalka Garsoorka
Qodobka 26: Xaqqa Racfaan-qaadashada
Qodobka 27: Is-khilaafka shuruucda
Qodobka 28 Guddiga Diyaarinta Dastuurka
Qodobka 29: Degaanka & Khayraadka Dabiiciga ah
Qodobka 30 Isimada
Qodobka 31: Jabhadihii horay u jirey
Qodobka 32: Sharciyadii horay u jirey
Qodoka 33: Dhaarta Xilka
Qodobka 34 Dhaqangalka Axdiga
qodobka 35 Wax-ka-beddelka Axdiga

# *ARARTA AXDIGA PUNTLAND*

*Magaca Naxariista iyo Naruurada Rabbi dartood, Annagoo ah Dadka Puntland:*

*WAXAA NAGA GO'AAN ah inaan waa cusub ambaqaadno, si aan uga sabata-baxno masiibaddii iyo dhaxalkii xanuunka iyo arammida lahaa oo ay sababeen Diktatooriyaddii dhacday, dagaalladii sokeeye oo ka sii xumaa iyo Ku guuldarraysiga waan-waanta dibuheshiisiinta qaran;*

*WAXAAN KU MINTIDAYNAA yagleelidda hannaan cusub oo horseedi kara Dawlad Soomaaliyeed oo Federaal ah kuna dhisan nabad iyo caddaalad;*

*ANNAGOO KA DUULEYNA Mabda'a wada-tashiga, waxaan dooneynaa in walaalahayaga Soomaaliyeed ku wada noolaadaan iaqaddarin iyo isu-garawsho;*

*WAXAAN OGSOONNAHAY in midnimada Soomaaliya ay ku dhalan karto hannaan nabadeed iyo isla-oggolaansho Dadka Soomaliyeed ka dhasha;*

*WAXAAN RAJEYNEYNAA kuna hawlgeleynaa, walaalahayo Soomaaliyeedna ugu yeereynaa in aan wadarjir ugu wada hawlagalno dib-u-hanashada mudnaantii Soomaaliya ku lahayd beesha caalamka;*

*ANNAGOO KU MINTIDAYNA in aan carruurtayada dhaxal-siinno nolol nabad, caddaalad, baraare iyo sugnaansho leh;*

*WAXAAN KU QEEXEYNAA Axdigan, lugu guddoonsaday Magaalada Garowe, curashada Dawlad cusub ee Puntland oo noqondoonta qayb ka mid ah Dawlad Federaali Soomaaliya;*

*SIDAA DARTEED WAXAAN XEERSANAY AXDIGAN KU-MEEL-GAARKA AH OO AH AMBAQAADKII SOOMAALIYA CUSUB.*

## AXDIGA DAWLADDA PUNTLAND

### QAYBTA 1-AAD. Arrimo Guud, Federaal, iyo Dhaqan.

### Qodobka 1-aad. Dawlad Goboleedda Puntland

1.1 Waxa la dhisay Dawlad Goboleedda Puntland.

1.2. Puntland waxay ka koobantahay gobollada Bari, Nugaal, Sool, Koofurta Togdheer - (Degaanada Buuhoodle), Mudug oo laga reebay (Degaanada Hobyo iyo Xarardheere) iyo bari, koofur iyo waqooyi bari Sanaag. Beelihii ka soo qayb galay shirkii wada tashiga ee Garoowe Febraayo 1998, oo aan joogin haatan Shirweynaha lagu dhisayo dawladda Puntland waxaa u furan in ay ku soo biiraan Puntland waqtiga ay u soo gudboonaato.

1.3. Soohdimaha Puntland waa kuwa gobollada ay ka kooban tahay la lahaayeen derisyadooda dagaallada sokeeye ka hor, lagumana soo xadgudbi karo midnimada dalka Puntland (dhul, bad iyo cir midna)

1.4. Puntland, waa qayb ka mid ah Somaliya, dadaalna ugu jirta soo-celinta midnimada ummadda Somaliyeed iyo curinta Dawlad Somaliyeed oo ku dhisan habka Federaliga oo abbaaro gudboon la wada leeyahay.

1.5. Muwaadin kasta oo Somali ah oo xurmaynaya Axdigan wuxuu xor u yahay degista, dhexmarka, ka ganacsiga, iyo ka xoogsiga dalka Puntland, taasoo lagu soo saari doono xeer hoosaad.

1.6. Dawladda Puntland xilalka iyo howlaha ay ku wareejin karto ama la wadaagi karto dawladda dhexe ee federaalka waxay ku imaanaysaa wada hadal.

1.7. Puntland waxay soo dhawaynaysaa qayb kasta oo Soomaaliya ka mid ah oo dhisata maamul kan Puntland oo kale ah, waxayna la galaysaa wada hadallo iyo is-kaashi loola jeedo in la gaaro dib-u-dhiska Dawlad Soomaaliyeed oo Federaal ah.

1.8 Puntland waa Dawlad leh qaab xukun baahsan, awoodda ugu saraysana - tan Eebe mooyee - shacbigu leeyahay.

1.9. Inta la gaarayo dhalashada dawlad Soomaaliyeed oo Federaal ah, Puntland waxay yeelaneysaa, inta ku siman soohdimeheeda, xuquuqihii awoodeed oo ay dawladdihii hore lahaayeen.

1.10. Puntland waxay dhawraysaa, xurmaynaysaana beelaha laga badan yahay xuquuqdooda.

1.11. Sharci ayaa lugu qeexayaa habka muwaadin Puntland lugu noqdo.

### Qodobka 2aad: Diinta Dawladda

2.1 Diinta Islaamku waa tan keliya ee Dawladda Puntland, saldhigna u ah dhammaan qawaaniinta, iyo dhaqanka bulshada.

### Qodobka 3aad: Caasimadda, Calanka, Astaanta (emblem) iyo Heesta (Muusikada) Qaranka.

3.1. Caasimadda dalka Puntland waa magaalada Garowe, Bosaasana waa xarunta ganacsiga.

3.2. Caasimadda Puntland waa fadhiga dhexe ee dawladda, xeer gaar ah ayaana lagu dhaqayaa.

3.3 Dawladda Puntland si ku meel gaar ah waxay u qaadatay Calankii, Astaantii iyo Heestii Qaranka ee Dawladdii Soomaaliyeed, inta laga samaynayo Dawlad Soomaaliyeed oo federaal ah.

**Qodobka 4aad:** **Afafka Puntland.**

4.1. Af-Somaligu waa Luqada rasmiga ah ee Dalka Puntland.

4.2. Af-Arabigu waa Luqada Labaad ee Dalka.

**Qodobka 5aad:** **Xiriirka Dibedda**

5.1. Inta la gaarayo dhalashada Dawlad Soomaliyeed ee Federaal ah, Dawladda Puntland waxay xushmaynaysaa una hoggaansamaysaa mabaadi'da iyo qawaaniinta caalamiga ah, waxayna xuduudeheeda ka hirgelineysaa wixii mucaahado, heshiisyo iyo xeerar caalami ah oo ay dawladihii Somaliyeed si sharciga waafaqsan u galeen, una ansixiyeen.

5.2. Dawladda Puntland waxay xushmaynaysaa, ayna ogoshahay Axdiga Qaramada Midoobey, Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Banii'aadamka, Mucaahadooyinka Caalamiga ah ee xuquuqda madaniga, kuwa siyaasadeed, dhaqaale, bulsho iyo dhaqanba.

5.3 Inta ay ka dhismayso Dawlad Somaliyeed oo federaal ah, dawladda Puntland waxay kaloo xushmaynaysaa, oggoshahayna axdiyada Jaamacadda Carabta, Ururka Midowga Afrika (OAU), Urur Goboleedda Horumarinta Geeska Afrika (IGAD) iyo Ururka Mu'tamarka Islaamka (OIC).

**Qodobka 6aad.** **Xuquuqda iyo Xorriyadaha Asaasiga ah**

6.1. Dawladda Puntland waxay si xushmad leh qof kasta ugu ballanqaadaysaa dhawridda xuquuqda caalamiga ah ee la aqoonsan-yahay lana xiriirta mucaahadoonyinka iyo heshiisyada caalamiga ah. Qofna lagu takoori mayo: isirka, midabka, jinsiga, afka, diinta, siyaasadda ama fikradda uu aaminsanyahay, hantida, ama dhalashada.

6.2. Iyada oo aanay saamayn ku yeelanayn ballanqaadyada guud, Dawladda Puntland waxay si gaar ah u aqoonsan-tahay xoriyadda iyo xuquuqaha asaasiga ah ee aadamiga ee soo socda:

b) Xoriyadda fikriga iyo garaadka, iyadoo diin aan diinta Islaamka ahayn lagu fidin karin dalka Puntland.

t) Xoriyadda hadalka iyo soo-bandhigidda ra'yiga faragelin la'aan iyo ka mid noqoshada, asaasidda ururro dhaqaale ama bulsho, ama ururo siyaaso, markii sharci Dawladda Puntland u samayso.

j) Xuquuqda gaar ahaaneed iyo nabad-galyada qofka.

x) Xoriyadda dhaq-dhaqaaq, degaan iyo ganacsi.

kh) Saxaafaddu waa madax bannaantahay wixii aan sharciga ka hor imaaneyn, xeer gaar ah ayaana qeexi doonaa.

6.3. Qofna laguma samayn karo jir-dil haddii aan si sharciga Islaamka waafaqsan maxkamadi ku xukumin, khasab looguma shaqaysan karo, addoonnimana looma haysan karo.

6.4. Dadku waa siman yahay Sharciga hortiisa. waxayna xaq u leeyihiin daryeelka sharciga, takoor la'aan.

6.5. Dawladdu waxay u hogaansanaanaysaa sharciga oo ku dhisan mabaadi'da Diinta Islaamka.

6.6 Qofna si sharci aan waafaqsanayn laguma xiri/qaban karo. Qof kasta oo la qabto ama la xiro waa in la hor geeyo Qaadi 48 saac gudahood, waana in uu helo xukun caadil ah muddo caqli gal ah ama la siidaayo. Eedeysanaha waxaa loo aqoonsanyahay dembi-laawe ilaa maxkamadi, si sharciga waafaqsan, ugu xukunto gelid dembi.

6.7 Qofna looma qaban karo fal markii uu galay aan dembi ku-ahayn sharciga.

6.8 Dembi iyo ciqaab aan sharciga waafaqsanayn ma jiri karaan. Mas'uuliyadda fal-ciqaabeedku waa shakhsi. Ciqaab aan maxkamad ka soo bixin cidna laguma fulin karo.

6.9 Qof ama koox kasta waxay xaq u leedahay in ay maxkamadda ka dalbadaan xal-u-helid marka ay wax ka tawdaan xuquuqda Axdigu siinayo ama sharci kale oo dalka Puntland ka jira.

6.10 Dawladdu waxay aqoonsan tahay xuquuqda muwaadinku u leeyahay wax-barasho, caafimaad iyo fursado shaqo, waxayna u-hawlgeleysaa sugidda xuquuqdaas takoor la'aan.

6.11 Dawladdu waxay ku dadaalaysaa horumarinta iyo kor u qaadidda kaalinta ay ku leeyihiin haweenku nolosha guud ee mujtamaca (dhaqanka, dhaqaalaha iyo siyaasadda).

6.12 Muwaadin kasta waxaa waajib ku ah, ka qayb galka Difaaca dalka marka loogu yeero: ilaalinta midnimada, dhawrista hantida guud ee dalka Puntland iyo bixinta cashuuraha ku waajibey.

6.13 Dawladda Puntland waxay aqoonsantahay lahaanshaha hantida gaar ahaaneed.

6.14 Dawladda Puntland waxay ku dhaqmaysaa habka dhaqaalaha suuqa xorta ah, waxayna dhiiri-gelineysaa dammaanadna siinaysaa maal-gelinta dalka (mid shisheeye iyo mid sokeeyaba), waxaana lagu qeexayaa xeer u gaar ah.

## QAYBTA 7-AAD. QAAB-DHISMEEDKA DAWLADDA PUNTLAND.

### Qodobka 7-aad.: Saddexda Qaybood ee Awoodaha Dawladda

7.1. Saddexda qaybood ee Awoodaha Dawladdu waxay u kala baxaan sidan:
( b) Golaha Wakiillada, (t) Golaha Xukuumadda, (j) Garsoorka.

7.2. Qofna kama mid noqon karo in ka badan qayb ka tirsan saddexda awoodood ee Dawladda. Qofkii loo magacaabo xil cusub, waa in uu iska casilaa xil-kasta oo uu horay uga hayey qayb kale.

### Qodobka 8-aad. Golaha Wakiillada

8.1. Awoodda Xeer dejinta Dalka Puntland waxaa u xilsaaran Golaha wakiillada, oo matala Shacbiga Puntland oo dhan.

8.2. Golaha Wakiilladu wuxuu ka kooban yahay 69 Wakiil: (i) 61- xubnood beelaha ayaa iska soo xulaya, (ii) Shan xubnood waxay u gaar yihiin haweenka oo midba Gobol laga soo xulayo, iyadoo ayan isla markaasna reebbanayn in lagu soo daro haween kale 61-da xubnood, iyo (iii) Saddex xubnood oo toos uga mid noqonaya Golaha Wakiillada oo lagu maamuusay Guddoomiyayaasha Ururadii siyaasadda "SSDF, USP, iyo SNDU").

8.3 Shirweynaha Dustuuriga ah ee Dawladda Puntland wuxuu u qaybiyey xubnaha Golaha Wakiillada qaab Shirku ku heshiiyey oo Gobol walba tiro goan u gartay, sida ku cad lifaaqa Kowaad ee Axdigan. Qaabkan hadda wax lugu qaybiyey wuxuu ku egyahay qaybtaan keliya.

8.4 Golaha Wakiilladu wuxuu si rasmi ah u dhismi doonaa muddo 45 maalmood gudahood ah oo ka bilaabata maalinta Axdigan la saxiixo, ama waqtigii ka horreeya oo magacaabidda wakiilladu soo ebyemaan, jiritaankiisuna wuxuu ku egyahay dhammaadka Axdigaan oo saddex sanno ah.

8.5. Golaha wakiilladu wuxuu dhisidoonaa Guddi joogto ah, oo ka kooban, (b) Guddoomiyaha Golaha wakiillada (t) Labada Guddoomiye ku xigeen iyo (j) Madaxda Guddiyada Golaha Wakiillada.

8.6. Muddada kala guurka xubnaha Golaha Wakiillada waxaa soo xulaya beelaha, ama ciddii ay wakiishaan, waxaana ansixinaya soona gudbinaya Isimada.

8.7. Golaha wakiilladu wuxuu yeelanayaa Xoghaye Joogto ah, aan xubin ka ahayn Golaha Wakiillada. Xoghayuhu waa in uu noqdo qof u qalma jagadaas, hawsha Golaha hanankara, wuxuuna hoos imanaya Guddoomiyaha Golaha Wakiilada.

**Qodobka 9-aad. Shuruudaha lagu xulayo Wakiillada Golaha.**

9.1. Qof kasta oo xil kas ah, miyirkiisu dhanyahay, muwaadin Puntland ah, da'diisu aaney ka yarayn 30 sano, oggolaaday Qodobka 2-aad ee Axdigan, wuxuu xaq u leeyahay in loo doorto Golaha Wakiillada.

9.2. Waa in aan maxkamadi horay ugu xukumin dembi khiyaamo qaran, xatooyo xoolo dadweyne ama fal-danbiyeed mujtamaca dhexdiisa ku xun.

9.3. Waa in uu leeyahay ugu yaraan aqoon dugsi sare ama waaya-aragnimo shaqo oo u dhiganta.

9.4. haddii xubin ka tirsan Golaha Wakiilladu lumiso wakiilnimadeeda waxaa soo dooranaya beddelkeeda beeshii ay ka tirsanayd sida ku qeexan Qodobka 8.6 ee Axdigan muddo 30 maalmood gudohood.

9.5. Maalinta la ansixiyo Axdigan waxaa jiritaan beelaya Golayaasha Shacbiga ee Gobollada Puntland.

**Qodobka 10-aad Mas'uuliyadaha iyo Awoodaha Golaha Wakiillada.**

10.1. Goluhu wuxuu iska dhexdooranayaa Guddoomiye hogaamiya Golaha iyo labo Guddoomiye ku xigeen oo kala ah Guddoomiye ku xigeenka 1-aad iyo Guddoomiye ku xigeenka 2-aad oo ka kaaliya gudashada xilkiisa.

10.2. Golaha wakiilladu waxay yeelanayaan xeer nidaamiye (xeer hoosaad) u gaar ah oo ay ku hawl galaan.

10.3. Hawlaha Golaha wakiillada waxaa ka mid ah:

b) Xeer samayn.
t) Dib-u-eegidda, oggolaanshaha, wax-ka-beddelidda iyo diidmada shuruucda uu soo jeediyo Golaha Xukuumaddu;
j) Ogolaanshaha, wax-ka-beddelka miisaaniyadda Golaha Xukuumaddu soo bandhigo;
x) U codaynta kalsoonida Wasiirada mid mid, marka uu soo jeediyo Madaxweynuhu iyo barnaamijka Xukuumaddu soo qaddinto.
kh) Ansixinta ama diidmada heshiisyada uu soo bandhigo Golaha Xukuumaddu ee la xiriira dhismaha Dawlad federaali ah ee Soomaaliya.
d) Ansixinta ama diidmada heshiisyada caalamiga ah ee Xukuumaddu gasho .
r) Ansixinta ama diidmada qorshayaalka Xukuumadda ee la xiriira baahinta maamulka ( Decentralisation provisions).
s) Magacaabidda: (i) Guddiga Diyaarinta Dustuurka, iyo (ii) Guddiga Doorashada.
sh) Ansixinta ama diidmada, muddo 30 maalmood gudohood ah marka la soo saaro, xeer xaalad deg-deg ah. Haddii la diido xeerka xaaladda Degdegga ah, wuxuu noqonayaa waxba kama jiraan, hase yeeshee hawlihii lagu fuliyey xaaladdaas deg-degga ah Golaha Wakiillada ayaa xaq u leh in ay ansixiyaan.

10.4. Golaha Wakiilladu waxay yeelanayaan fadhigooda ugu horreeya 7 maalmood gudohood, markii la soo dhiso sida uu qorayo Qodobka 8.4, waxayna yeelanayaan kalfadhigooda caadiga ah labo jeer sanadkii iyo markii kale ee ay go'aansadaan, sida ku cad Qodobka 10.2. Madaxweynuhu wuxuu Golaha isugu yeeri karaa fadhi deg-deg ah, sidoo kale 1/3 xubnaha Golaha Wakiillada ayaa qoraal ku dalbi kara shir aan caadi ahayn ee Golaha.

Qodobka 11-aad     **Xasaanadda (Immunity) Golaha Wakiiladda**

11.1. Wakiil ka tirsan Golaha Wakiillada lama qaban karo, lamana baari karo jirkiisa iyo gurigiisa, haddii aan lagu qaban isagoo fal-danbiyeed culus faraha kula jira. Golaha wakiilladu wuxuu cod haldheeri kaga qaadi karaa Xasaanadda Wakiil kasta, haddii uu Xeer Ilaaliyaha Guud soo hordhigo cadayn ay ku qancaan oo la xiriirta gelid fal-danbiyeed.

Qodobka 12-aad     **Golaha Xukuumadda**

12.1. Muddada uu dhaqan-galka yahay Axdigani awoodda fulinta ee Dalka waxaa u xilsaaran Golaha Xukuumadda.

12.2. Golaha Xukuumaddu wuxuu ka kooban yahay : (b) Madaxweynaha Dawladda (Madaxweyne), (t) Ku-xigeenka Madaxweynaha Dawladda, iyo (j) ugu badnaan Sagaal (9) Wasiir.

12.3. Shuruuradaha lugu dooranayo Madaxweynaha Dawladda iyo ku xigeenkiisa iyo wasiiradu waa sidaan:

i. Waa in uu yahay Somali, muslim ah, kuna dhaqma diinta Islaamka, isla markaasna muwaadin Puntland ah.
ii. Waa in uu aqoon maamul, waaya-aragnimo hoggaamineed oo sarreysa iyo tacliin heer sare leeyahay.
iii. Waa in aan da'diisu 40 sano ka yareen markuu xilka qabanayo.
iv. Waa in miyirkiisu taam yahay, uusan gelin dambi khiyaamo qaran, xatooyo xoola dadweyne, danbi bani'aadamnimada ka horjeeda iyo in aan lagu aqoon fal mujtamaca dhexdiisa ku xun.
v. Shuruudaha kor ku xusan Wasiiradu waxay kaga duwan yihiin da'da oo 35 sano ah.

12.4. Madaxweynaha Dawladda iyo Ku-xigeenkiisa waxaa lugu dooranayaa Shirweynaha Dastuurka ee May 1998.

12.5. Awoodaha iyo xilalka Madaxweynaha Dawladda waxaa ka mid ah:

i. Waa madaxa Dowladda iyo Guddoomiyaha Golaha Xukuumadda;
ii. Wuxuu mas'uul ka yahay, hogaaminta siyaasadda guud ee dalka Puntland.
iii. Wuxuu leeyahay awoodda magacaabidda Wasiirada Golaha Xukuumadda, isagoo la tashanaya ku-xigeenkiisa;
iv. Wuxuu leeyahay awoodda saxiixidda heshiisyada Caalamiga ah, iyo heshiisyada looga jeedo dhismaha Dawlad Federaali ah ee Soomaliyeed, iyadoo heshiisyadaas laga ansixinayo Golaha Wakiillada;
v. Waa taliyaha guud ee ciidamada qalabka-sida;
vi. Wuxuu leeyahay awoodda fidinta saamaxaadda iyo cafiska, markii uu la tashado hay'adaha Dawladda ee ay khusayso;
vii. Isaga ama xafiiskiisu waxay leeyihiin qaabilaadda marti-sharafta ajnabiga ah, iyo in uu dalka dibaddiisa ugu safro danaha Puntland;
viii. Madaxweynuhu markii ay u sugnaato in Golaha wakiilladu waajibaadkiisii gudan waayey ama ku xadgudbay Axdigan, isagoo la tashanaya Guddoomiyaha Golaha Wakiillada wuxuu awood u leeyahay in uu, si sababaysan, u kala-diro Golaha Wakiillada, waana in uu amar ku dhiibaa 45 maalmood gudahood in lagu soo xulo Gole cusub sida ku qeexan Qod. 8.6 ee Axdigan.
ix. Wuxuu u xilsaaranyahay Ilaalinta iyo dhawrista diinta Islaamka.
x. Wuxuu u xilsaaranyahay Ilaalinta iyo dhawrista Shuruucda iyo Qawaaniinta dalka Puntland;
xi. Wuxuu leeyahay awoodda hadal jeedinta furitaanka kalfadhiyada Golaha Wakiillada.
xii. Wuxuu leeyahay awoodda ku-dhawaaqidda Xaaladda Degdegga ah, isagoo la tashanaya Golaha Xukuumadda, isla maalintaasna wargelinaya Golaha Wakiillada.
xiii. Isaga iyo xafiiskiisu waxay leeyihiin in ay magaca iyo haybadda shacbiga Puntland ku bixiyaan billad sharaf iyo abaal-marin.

xiv. Waa in uu diyaariyaa miisaaniyadda Kutalagalka ah ee Xukuumadda, horgeeyaana Golaha Wakiillada bisha Oktoobar sannad kasta, 30-ka Bisha Juun ka horna waa in uu Golaha Wakiillada soo hor dhigaa xisaab xirka sannadkii dhammaaday.

xv. Wuxuu saxiixaa shuruucda Golaha Wakiilladdu ay ansixiyaan iyo go'aamada iyo qoraallada rasmiga ah ee ka soo baxa Golaha xukuumadda.

12.6. Marka ay dhacdo in Madaxwaynuhu ka maqan yahay Dalka ama uu si ku-meel-gaar ah u gabo gudashada xilkiisa, Ku-Xigeenkiisa ayaa sii wadaya hawshiisa, iyadoo aan Madaxweynuhu ka maqnaan karin dalka muddo ka badan 60 maalmood.

12.7 Haddii Madaxweynuhu geeriyoodo, xilkii laga qaado, ama is-casilo, Xilkiisu wuxuu ku wareegayaa Ku-Xigeenka oo ahaanaya Madaxweynaha Dawladda muddada ka dhimman xilliga kalaguurka sida ku cad Axdigaan. Haddii xaaladdaasi dhacdo, Golaha Wakiilladu wuxuu soo dooranayaa Ku-Xigeen muddo 30 maalmood gudohood.

12.8 Haddii Madaxweynaha iyo Ku-xigeenkiisuba geeriyoodaan, is-casilaan ama xilkii laga wada qaado, Guddoomiyaha Golaha Wakiillada ayaa xilkii sii wadaya ilaa inta Golaha Wakiilladu, 15 maalmood gudohood, Ku dooranayaan Madaxweynaha Dawladda iyo Ku-xigeen cusub.

12.9. Madaxweynuhu wuxuu awood u leeyahay in uu diidmo qayaxan (Veto) ku celiyo sharci Golaha Wakiilladu ansixiyeen, isagoo raacinaya sababayn cad. Diidmada qayaxan ee Madaxweynuhu waxay ku buri-kartaa codayn cusub ee Golaha Wakiilladu ku soo celiyaan sharcigii saddex-meelood-labo tiradooda guud, 30 casho gudohood, laga bilaabo taariikhdii diidmada..

12.10 Awoodaha iyo xilalka ku-xigeenka Madaxwaynuhu waa sidan:

i. Sii wadidda xilalka Madaxweynaha markuu Dalka ka maqan yahay ama si ku-meel-gaar ah uusan shaqada u gudan karin,

ii. Kala talinta Madaxweynaha xulashada Wasiirada iyo shaqo ka fariisintooda.

iii. Fulinta hawlaha Madaxwaynuhu u wakiisho, ee aan ka baxsanayn xilalka iyo waajibaadka Madaxweynaha Axdigaani siinayo.

iv. Wuxuu noqonayaa Madaxweynaha Dawladda Dalka marka ay sugnaadaan xaaladaha ku tilmaaman qodobka 12.7 ama uu dhaqan galo qodobka 14.

**Qodobka 13aad. Wasaaradaha iyo Hay'adaha Xukuumadda**

13.1. Waxaa jiraya ugu badnaan sagaal (9) Wasaaradood oo ay hoggaamiyaan wasiirro Madaxweynuhu magacaabay, Golaha Wakiilladuna ansixiyeen. Qaab-dhismeedka Waaxyaha Xukuumadda waxaa lagu soo saarayaa xeer-nidaamiye kala qeexa hawlohooda.

13.2. Madaxweynuhu wuxuu abuuri karaa Hay'ado gaar ah oo loo xilsaaro hawlo cayiman, kuwaas oo ay Golaha Xukuumaddu ka ansixiyaan Golaha Wakiillada, xeer-nidaamiye gaar ahna loo samaynayo.

13.3. Dhammaan Hay'adaha Xukuumaddu waxay u shaqaynayaan hab waafaqsan Qodobka 6 ee Axdigan.

13.4. Mas'uuliyadda Golaha Xukuumaddu waa wadar iyo shakhsiba.

13.5. Xilliga kala-guurka ah, waajibaadka Golaha Xukuumaddu fulinayo waxaa ka mid noqonaya:

i. Hub-ka-dhigidda maleeshiyada iyo dadka kale ee hubka sharci-darrada ku haysta iyo u-fidinta cafis gaar ah markii loogu baahdo hirgelinta hawlahaas.

ii. Abuurista ciidamo nabadgelyo oo hanankara nabadda gudaha iyo dibedda, iyo u-hawlgalka shaqo-u-abuuridda ciidamadii hore iyo maleeshiyada.

iii. Qorshe-u-dejinta qaxootiga iyo dadka soo barakacay.

iv. Dib-u-dhiska, dhaqancelinta iyo nabadaynta bulshada ku aafowdey dagaalada sokeeye.

v. Diwaan-gelinta iyo dib-ugu-soo-celinta gacanta Puntland hantidii maguurtada ahayd ee Dawladdii Soomaaliya lahayd.

vi. Abaabulidda iyo taakulaynta hawlaha tiro-koob guud, iyo qorsheynta shaqada Guddiga Doorashada.

vii. Abaabulidda iyo taakuleynta hawlaha Guddiga Dastuurka iyo diyaarinta afti lagu ansixinayo Dastuurka.

viii. Diyaarinta qorshe dhaqan-dhaqaale isu-dheelli-tiran.

**Q odobka 14-aad. Xasaanad ka qaadidda Madaxweynaha Dawladda iyo Ku-xigeenkiisa**

14.1 Golaha Wakiilladu waxay cod dhan saddex-meelood-labo (2/3 vote) xasaanadda kaga qaadi karaan Madaxweynaha Dawladda, iyo ku-xigeenkiisa markii Xeer Ilaaliyaha Guud soo hordhigo dacwad ay ku qanceen in uu jiro fal danbiyeed khiyaamo qaran ama ku xadgudub Axdiga Puntland si bareer ah.

14.2. Golaha wakiilladu, markii ay u codeeyaan oo ku aqbalaan saddex meelood oo laba meelood, ayaa eedeyn lagu soo oogi karaa Madaxweynaha ama Ku-xigeenkiisa.

**Qodobka 15-aad. Xil ka qaadista Wasiirada.**

15.1. Madaxwaynaha Dawladdu, isagoo la tashanaya ku-xigeenkiisa, wuxuu shaqada ka fariisin karaa mid ama dhammaan wasiirada Xukuumadda, waana inuu sababeeyaa xil ka fariisinta.

**Qodobka 16-aad: Xasaanadda (Immunity) Wasiirada**

16.1 Wasiirada Xukuumadda lama qaban karo, jirkooda iyo guryahoodana lama baari karo haddii aan keli ama koox ahaan lugu qaban iyagoo faraha kula jira fal-danbiyeed culus. Golaha Wakiilladu kadib markii uu arko, kuna qanco caddaynta Xeer Ilaaliyaha Guud soo hordhigay, wuxuu Xasaanadda ka xayuubin karaa Wasiirada danbiga lagu soo oogey.

**Qodobka 17-aad. Hay'adaha Madax-bannaan**

17.1. Hay'adaha madaxa bannaan ee dawladdu waxay ka kooban yihiin: (b) Hanti-dhowrka Guud, (t) Bankiga Dhexe ee dawladda, iyo Hay'adihii kale ee timaadada loo arko lagama maarmaan.

17.2. Madaxda Hay'adaha madax-bannaan waxaa magacaabaya Golaha Xukuummadda, waxaana ogolaanaya Golaha Wakiillada. Madaxdaas waxaa shaqada looga qaadi karaa marka ay ku caddaato in ay jebiyeen sharci ama karti yari, iyadoo Golaha Xukuumaddu soo jeedinayo, Golaha Wakiilladuna ku ogolaado cod-bixin haldheeri ah.

17.3. Mas'uuliyadaha iyo hawlaha hay'adaha madax-bannaan waxaa lugu qeeexaya sharciyo u gaar ah.

**Qodobka 18-aad. Ku baahinta Awoodda Maamulka Gobollada iyo Degmooyinka.**

18.1. Iyadoo la raacayo mabaadi'da baahinta is-xukunka, Puntland waxay ku dhaqmaysaa qaabka baahinta xukunka.

18.2. Dawladda Puntland ayaa u xil saaran dib-u-habaynta iyo xadaynta Gobollada iyo Degmooyinka dalka Puntland, inta laga dhamaystirayo sharciga xukun baahinta.

18.3. Dawladda Puntland waxay hirgalinaysaa habka is-maamul gobolleedka, haddase duruufta jirta awgeed waxay magacaabaysaa Guddoomiyayaasha Gobollada iyo Degmooyinka, iyadoo la tashatay madax-dhaqameedka degaamada.

18.4. Dawladda Puntland waxay awood u leedahay isku dhafidda Boliiska oo dhan iyo kala beddelkooda.

Qodobka 19-aad. Garsoorka

19.1. Garsoorku waa ka madax-bannaan yahay hay'adaha xeer-dejinta iyo midda fulinta, shareecada Islaamka ayuu u hoggaansan yahay, wuxuuna ka kooban yahay: b) Maxkamadaha caadiga ah, iyo t) Xafiiska xeer ilaalinta.

19.2. Hay'addaha garsoorka caadiga ah waxay ka koobmaan: (b) Maxkamadda sare, (t) Maxkamadaha rafcaanka, iyo (j) Maxkamadaha darajada koowaad.

19.3. Shuruudaha lagu qaadanayo Garsoorayaasha iyo Qaadiyada waxaa lagu qeexayaa xeer nidaamiye u gaar ah.

**Qodobka 20-aad. Maxkamadda Sare.**

20.1. Maxkamadda Sare waa tan ugu sarraysa maxkamadaha caadiga ah ee dalka Puntland. Tirada xubneheeduna waa shan (5) xubnood, Guddoomiye, ku-xigeen iyo sadex garsoore.

20.2. Maxkamadda Sare waxay qaadaysaa dacwadaha laga soo qaato xukunnada ka dhammaaday maxkamadaha rafcaanka.

20.3. Magacaabidda Guddoomiyaha Maxkamadda Sare waxaa soo jeedinaya Golaha Xukuumadda, waxaana oggolaanaya Golaha Wakiillada.

20.4. Guddoomiya Maxkamadda Sare waxaa xilka looga fariisin karaa hab la mid ah kan ku qeexan Qod. 14.1. iyo 14.2. ee Axdigan.

**Qodobka 21-aad. Maxkamadda Dastuuriga.**

21.1. Marka ay dhashaan arrimo dastuuri ah waxaa galaya xubnaha Maxkamadda Sare oo isu beddeleya Maxkamad Dastuuri ah laguna daray Afar xubnood oo gar-yaqaano ah.

21.2. Maxkamadda Dastuuriga ahi waxay ka kooban tahay: (b) Garsoorayaasha Maxkamadda Sare oo uu Guddoomiye u yahay Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, (t) Labo gar-yaqaan oo ay soo magacaabaan Golaha Wakiilladu, iyo (j) Labo gar-yaqaan oo uu soo magacaabo Madaxwaynaha Dawladdu.

21.3. Xubnaha Maxkamadda Dastuuriga ahi waxay jirayaan marxaladda kala-guurka ah ee Axdiga (Saddex sano).

21.4. Go'aamada Maxkamadda Dustuuriga waxay ku ansaxayaan haldheeri xubneheeda, waa in aysan qarsoodi ahayn, waa in la diiwaan geliyo, waxayna leeyihiin awood sharciyeed oo ku salaysan qawaaniinta iyo Dastuurka Puntland.

21.5. Maxkamadda Dastuuriga ahi waxay awood u leedahay ka tarjumidda dhammaan arrimuuraha iyo is-maandhaafka ka yimaada Axdigan iyo qawaaniintiisa, gaar ahaan:

b. Ka tarjummidda Axdigan.
t. Iswaafajinta qawaaniinta iyo Dastuurka Puntland iyo Shareecada Islaamka.

21.6. Maxkamadda Dustuuriga ahi waxay qaadaysaa dacwadaha uga yimaada:

i. Codsi ay ugu yaraan saddex meelood oo hal meel xubnaha Golaha Wakiilladu u soo qaddimaan in qodob ama go'aan Goluhu ama Xukuumaddu qaadatay, ku xad gudbay Axdigan, ama Dastuurka Puntland.
ii. Markii qof ama dad shacbi ahi ku soo dacwoodaan in lagu xad gudbay xaquuqdoodii asaasiga ee Dastuurku siinayey, iyagoo marka hore dacwadooda ay Maxkamadi soo dhegeysatey, kuna qanacday in ay sugnaatay arrin Dastuurka la xiriirta.

iii. Markii qayb ama laan ka mid ah Dawladda Puntland ay dalbato in Maxkamaddu go'aan ka gaarto ismaandhaaf u dhexeeya awoodaha dawladda.

**Qodobka 22-aad Xeer Ilaaliyaha Guud iyo Xafiiskiisa**

22.1. Magacaabidda Xeer Ilaaliyaha Guud waxaa soo jeedinaya Golaha Xukuumadda, waxaana oggolaanaya Golaha wakiillada.

22.2. Xeer Ilaaliyaha Guud wuxuu awood gaar ah u leeyahay in uu dacwad ku soo oogo kagana muddaco saraakiisha sare ee Dawladda, Maxkamadda Sare horteeda.

22.3. Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud waxaa lagu maamulayaa sharci u gaar ah.

22.4. Xeer Ilaaliyaha Guud wuxuu u xilsaaran yahay:

i. Dhawrista sharciyada iyo ka hortagga dhaqan-xumada dalka Puntland gudihiisa.
ii. Baarista, oogidda iyo ku muddaca danbiyada;
iii. Kormeerista xabsiyada iyo xarumaha dhaqan-celinta;
iv. Ilaalinta iyo difaaca xuquuqda Agoonta, dadka aan dhimirkoodu dhammayn, iyo cid kasta oo u baahan daryeelka Sharciga.

**Qodobka 23-aad: Guddiga Sare ee Garsoorka.**

23.1. Guddiga Sare ee Garsoorka waxaa lagu dhisayaa laguna maamulayaa sharci gaar ah oo Golaha Xukuumaddu soo jeediyey, Golaha Wakiilladuna oggolaaday.

23.2. Guddiga Sare ee Garsoorku wuxuu ka kooban yahay: Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, Xeer Ilaaliyaha Guud, Saddex garsoore iyo labo qareen oo bulshada laga soo xulay. Sadexda garsoore iyo labada qareen waxaa soo sharraxaya Golaha Xukuumadda waxaana oggolaanaya Golaha Wakiillada.

23.3. Guddiga Sare ee Garsoorka ayaa u xilsaaraan magacaabidda, shaqo-gelinta, beddelka, dallacsiinta iyo anshaxa iyo abaal marinta garsoorayaasha iyo shaqaalaha kale ee garsoorka.

**QodobkaA 24-aad. Xasaanadda (Immunity) Garsoorayaalka**

24.1. Garsoore lama qaban karo, lama baari karo haddii aan oggolaansho laga helin Guddiga Sare ee Garsoorka ama aan lagu qaban isaga oo fal-danbiyeed culus faraha kula jira, markaasna waxaa si deg-deg ah loo war-gelinayaa Guddiga Sare ee Garsoorka.

24.2. Haddii Xeer Ilaaliyaha Guud lagu qabto isagoo fal-danbiyeed culus faraha kula jira, waxaa arrinta la gaarsiinayaa Golaha Wakiillada si looga ansixiyo xiritaankiisa iyo dacwad ku oogistiisa.

**Qodobka 25-aad Xilalka Garsoorka.**

25.1. Mas'uuliyadaha, Awoodaha iyo shaqooyinka garsoorka waxa lagu xaddidayaa sharci.

25.2. Waxa si sharci ah lagu dhisi kara laamo Maxkamadeed oo gaar ah.

25.3. Maxkamad gaar ah oo aan ahayn tan ciidamada qalabka-sida lama dhisi karo.

25.4. Garsoorka Dawladda Puntland wuxuu aqoonsan yahay go'aammada suluxa, dhex-dhexaadinta, iyo heshiisiinta mujtamaca dhexdiisa oo xeerka ku dhisan.

30.3. Muddada kala guurka ah xulka xubnaha Golaha Wakiillada waxaa soo ansixinaya, soona gudbinaya Isimadooda, sida ku qeexan Qod. 8.6. ee Axdigan.

30.4. Dastuurka cusub ee loo dejinayo Puntland ayaa qeexi doona xilalka iyo dawrka Isimadu yeelan doonaan, si loo xaqiijiyo haybaddooda.

**Qodobka 31-aad. Jabhadihii (Ururradii) horay u jiray**

31.1. Ururadii Siyaasadda ee ka jirey dalka Puntland (SSDF, USP iyo SNDU) maalinta Axdigan la ansixiyo ayaa la laalay jiritaankooda muddada ku meelgaarka ah, wixii xilal ahaa ee dadka iyo dalka u hayeenna waxay ku wareegeen Xukuumadda Puntland. Muddada kala guurka ah lama asaasi karo ururo siyaasadeed ee cusub ilaa laga sameeyo sharci xaddidaya dhaqankooda.

31.2. Saddexda Guddoomiye ee Ururada SSDF, USP, SNDU waxaa lagu maamuusay in ay si toos ah xubno uga noqonayaan Gollaha Wakiillada dalka Puntland haddii aysan xil kale ka dooran. Maamuusiddani waxay ku egtahay inta Axdiga ku meel-gaarka ahi jiro keliya, iyo Guddoomiyeyaasha Ururadaas.

**Qodobka 32-aad Sharciyadii horay u jirey.**

32.1. Sharciyadii dawladihii hore dejiyeen sidoodii ayey u taagnaanayaan si ku meel-gaar ah ilaa lagu beddelo shuruuc cusub, haddii aaney ka hor imaneyn shareecada Islaamka ama qawaaniinta iyo xeerarka Axdigani qeexayo.

**Qodobka 33-aad. Dhaarta Xilka**

33.1. Qof kasta oo xil u qabanaya Dawladda Puntland waxaa loogu dhaarinayaa xilka loo dhiibey, sidatan: "Waxaan magaca Illaahay ku dhaaranayaa in aan Diinta Islaamaka xurmeeyo, Axdiga dalka Puntland iyo qawaaniintiisa dhawro, xilka la'ii dhiibay daacadnimo u guto, dalka iyo dadkiisana lillaahi ugu adeego"

**Qodobka 34aad: Dhaqan-galka Axdiga**

34.1. Axdigan Puntland wuxuu dhaqan gelayaa maalinta Shirweynaha Garoowe May - 1998 ansixiyo, wuxuuna jirayaa saddexda sanadood oo kala guurka ah keliya, waxaana beddelaya Dastuurka cusub ee Puntland.

34.2. Haddii sabab kasta awgeed dawladdu ku diyaarin waydo Dastuurka cusub saddexda sano ee kala guurka ah gudahooda, Golaha Wakiillada iyo Golaha Xukuumaduba waa jiritaan beelayaan. Xilkii Madaxwaynaha Xukuumadu wuxuu ku wareegayaa Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, oo laga doonayo in uu 30 maalmood gudahood isugu yeero Shirweyne Gobolladii ku bahoobay Dawladda Puntland, si ay xaaladda cusub uga go'aan qaataan.

**Qodobka 35-aad: Wax-ka-beddelka Axdigan (Charter Amendments).**

35.1. Qodobada Axdigan waxaa beddeli kara Golaha Wakiillada marka laga reebo Qodobada ku cad qodobka 35.2, wax-ka-beddelkaas oo ku imanaya markii ay laba jeer oo ugu yaraan Bili u dhexayso, marwalba afar meelood sadex ($^{3/4}$) xubnaha Golaha Wakiilladu isku raacaan beddelka qodob ka mid ah Axdigan.

35.2. Qodobada 1.1, 2, 6., 7., iyo 34 ee Axdigan lama beddeli karo.

## Lifaaqa Kowaad ee Axdiga Puntland

Kala qaybinta xubnaha Golaha Wakiillada

Sida ku cad Qodobka 8.3 ee Axdigan, Shirweynaha Dhismaha Dawladda Puntland, wuxuu heshiis ergada dhexdeeda ka dhashay ku gaarey, codbixinna ku ansixiyey, in xubnaha Golaha Wakiillada ee muddada Ku meelgaarka ah ay noqoto guud ahaan 69 (Lixdan iyo Sagaal xubnood), loona kala qaybiyo sidan soo socota:

1. In Saddex xubnood lagu maamuuso guddoomiyeyaasha Ururadii la laalay ee SSDF, USP iyo SNDU, oo aan cidina guddoomiyaha beddelkiisii buuxin karin, haddii uu isagu banneeyo xilkaas.

2. In shan xubnood si gaar ah loogu qoondeeyo haweenka gaar ahaantooda, oo Gobolkiiba ay hal xubin qaadato, iyadoo haweenku xubnaha haray ee 61 ka ahna ka mid noqon karaan.

3. In 61 ka xubnood oo haray, loo kala siiy Gobollada sida soo socota :
    a. Gobolka Bari 20 Xubnood, iyo mid Haweenka (wadar 21xubnood);
    b. Gobolka Sool iyo Degmada Buuhoodle 14 xubnood iyo mid Haweenka (wadar 15 xubnood);
    c. Gobolka Sanaag 10 xubnood iyo mid Haweenka (wadar 11xubnood);
    d. Gobolka Waqooyi Mudug 9 xubnood iyo mid Haweenka (wadar 10 xubnood),
    e. Gobolka Nugaal 8 xubnood iyo mid Haweenka (wadar 9 xubnood).

Axdigan markii ergada Shirwenuhu ka dooday, qodobada qaarkoodna si gaar iyo mar gaar ah loogu codeeyey, guud ahaanta Axdigan, waxaa Shirweynuhu cod aqlabiyad ku ansixiyey maalintii 30ka Juun 1998, iyadoo ay 402 ergey oo ka mid ah 468 ergey ay shirka maalintaas joogeen, oo 359 xubnood ay isla aqbaleen, Gobol walbina aqlabiyaddisu aqbashay.

### *Magacyada Shirguddoonka Shirweynaha Puntland*

1. Axmed Maxamed Goole, Ku- xigeenka Guddoomiyaha
2. Cabdullaahi Khaliif Xaashi, Xubin ..........................................
3. Bashiir Yuusuf Nuur " ..........................................
4. Bootaan Barre Samatar " ..........................................
5. Cawad Axmed Casharo " ..........................................

...........................................................................

**Islaan Maxamed Islaan Muuse**
**Guddoomiyaha Shirguddoonka Shirweynaha Puntland**